

Puntland Liberation Party (PLP)

March 28, 2006

Ujeedo: Baaq Nabadeed oo ku wajahan Madaxda Sare ee Maamul Goboleedka Puntland.

Ka: Xafiiska Gudoomiyaha Ururka Puntland Liberation Party (PLP)

Waxaan idin farayaa waa inaan la burburin rajada iyo himiladda qaranimo, deganaanshaha iyo nabad ku wada noolaanshaha beelaha isirwadaaga ah, walaalahana ah ee ku wada nool goboladda Puntland. Goboladda Puntland waxaa ku nool qabaa'il walaalo ah oo isu tagey oo ku heshiiyay xeer iyo qawaaniin dhamaantood maslaxadi ugu jirto, taas run ahaantii horumar la taaban karo ayay dhamaantood ku gaari lahaayeen , hadii aan madaxda sar sare aanay qadiyada marin habaabiyeen wadadiina ka weeciyeen. Muhiimadda waxay ahayd in la helo cadaalad xaq soor ku dhisan, taas macnaheedu waxaa weeye in dib loo saxo Dastuurka Puntland iyo Golaha Barlamaanka, loona qaybiyo Golaha Barlamaanka tiro is la eg oo ka kooban qabaa'isha Goboladda Puntland oo dhan. Maxaa wacay, gobonimada iyo dowladnimadu waa wareegto, waa in la helaa Madexweyne si cadaalad ah loosoo doortay, una ah dhexdhedaad qabaa'isha Goboladda Puntland ku dhaqan. Wasiiradda dowlada ee Madexweynuhu magacaabayoo waa in qabiil kasta oo degan Puntland ku yeesho cid matasha, oo odayaal dhaqameedkiisu meesha keensadeen. Hadii qabiil ka mida qabaa'isha midowday uu kursiyadii uu lahaa waayo midowga wuu isaga baxayaa, hadii hal qabill ka baxana waa maamuulkii oo burburay. Sidaa darteed, waa in la helaa siyaasad xaq soor ku dhisan iyo isu dheeli tirida ay qabaa'isha Puntland ku nool oo dhan ka kooban yihiin. Si burburka iyo jahwareerka Puntland ay qarka u saaran tahay looga badbaadiyo waxaa Ururka Puntland Liberation Party (PLP) uu soo jeedinaya qodoban soo socda:

1. Waan in maamulku joojiyo amarku taagleynta iyo muruq sheegashada qabiilka salka ku haysa oo shacabka lagu caburinaayo. Iyadoo maamulku isticmaalayo ciidamadii dhexdhedaadka u ahaa dadka reer Puntland oo dhan.

2. Waa in la dhowraa lagana daayaa boobka hantida qaranka iyo tan shacabkaba taasoo loo adeegsanayo dano gaar ahaaneed.
3. Waa in loo sinaadaa kheyraadka bad iyo beriba shacabka ku nool Puntland oo dhan oo aaney ku takri falin dad gaar ah ayadoo maamulku raali uga yahay.
4. Waa in la joojiyaa dhaqaalaha Puntland oo lagu bixinayo arrimaha siyaasadeed shaqsiyaad gaar u ha oo shacabka Puntlandna ka qatan yihiin.
5. Waa in maamulka Puntland uu fiiro gaar ah siiyo maamul qeybsiga degaanadda Puntland oo dhan.
6. Waa in Madaxweynuhu awood gaar ah u leeyahay inuu shaqadda ka cayrin karo Wasiiradda musuqmaasaqu hareeyay ee maamulkiisa ku jira.
7. Waa in la helo urur mucaarad ah oo ka mid ah dowladda una shaqeeya danaha dadweynaha, xorna u ah inuu farta ku fiiqi karo meelaha daldalooda ka jiraan.
8. Waa inuu maamulka Puntland ka waantoobo heshiisyadda uu lala galaayo shirkadaha ajnabiga ah iyo baadhitaanka kheyraadka dabiiciga ah, taasoo uusan sharci ahaan u lahayn maamul goboleedku oo ay xaq u leedahay Dowladda Federaaliga ah.

Gudoomiyaha

Maxamuud M. Shalab-Shalab
mjama200587@hotmail.com
putlandliberationparty@yahoo.com